



Istaraatiijiyada Saamayn Badan Oo Loogu Talagalay Guriga

Istaraatiijiga Xisaabta Ee 1'waad

Taageer Ilmahaaga Su'aalo Qoraal Ah

“Xisaabta waxaa waaye maaddo ku saabsan waxyaabo xiriir ka dhexeeyo iyo waxaa waaye nooc ka mid ah wada hadalka ama xiriirka.” Jo Boaler



Xiriira Waqti Go'an Maalin Kasta



Ku Xiriira Meel Khaas Ah



Ku Xiriira Wada Hadal



Ku Xiriira Waxyaabaha La Xiriira Tignoolojiga Iyo Qoraal

Noqo Qof Wanaag Ku Fikira!

Ku dhaqaaq hawsha adigoo dabeecad wanaagsan leh. Wax barashadu waxay u baahan tahay adkaysasho! Diyaarso waxyaabo lagu matali karto wixi u baahan in la xisaabiyo—wax kasta oo loo isticmaali karo in wax lagu tiriyo sida qalimada midabka leh (crayons), qadaadiic, iyo kuulo (beads).

Ka hor intiidan ka jawaabin su'aasha:

Akhri su'aasha markaas weydii: Maxay sheekada su'aasha ku saabsan tahay?

Mar labaad akhri su'aasha markaas weydii: Maxay tirooyinka matalayaan?

Hal mar dheeraad ah akhri su'aasha markaas weydii cunugaaga: Maxay su'aasha na weydiineysaa oo ay rabtaa inaan ogaano?

Inta Aad Ku Jirtiin Shaqada:

Cunugaaga ha isticmaalo waxyaabaha wax lagu tiriyo siduu u muujiyo waxyaabaha uu tirinaayo iyo/ama sawiro ha ka sameeyo.

Cunugaaga ha calaamadeeyo waxyaabaha la tirinaayo.

Cunugaaga ha ka jawaabo su'aasha: fadlan xusuusnow waxaa jiro dhowr nooc oo wax looga jawaabi karo.

Marki Su'aasha Laga Jawaabo Ka Dib:

Weydii ilmahaaga:

Sidee oga jawaabtey su'aasha?

Maxaa su'aasha sidaan oga jawaabtey?

Ma jiraa hab kale oo looga jawaabi karo su'aashaan?



Fadlan tag boggaga intarnetka ee soo socda si aad oga heshid waxyaabo dheeraad ah ay qoysaska ka faa'iideysan karaan:

YouCubed – www.youcubed.org

National Council of Teachers of Mathematics – www.nctm.org

National PTA – www.pta.org